




# ASTAAMO AADMINNIMO

ICRC

SI KOOBAN

# ASTAAMO AADMINNIMO

Astaamaha Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas waa astaamo caalami ah oo dadka dhibaatooyinka aadminnimo ay ku habsadaan rajo u ah. Calaamad gargaar ayay u yihiin bulshooyinka aan weli ka biskoon colaadihii hubaysnaa ee ay u soo joogeen iyo gacan-ka-hadalladii kale ee ay soo mareen amaba guuldarrooyin dabiici ah oo horay ula soo darsey.

Hadday ka soo laalaadaan qoorta takhtar isbitaal goobta ku yaal ka shaqaynaaya, hadday ku dheggan yihiin dhinacyada baabuur ay saaran yihiin dad dagaal ku soo dhaawacmay, hadday ka muuqdaan dayuurad kaalmo degdeg ahi ay ku raran tahay; mar kastaba astaamahaasi waxay calaamad u yihiin eex la'aan, dhexdhexaadnimo iyo hawlgal aadminnimo oo madax bannaan, dadka dunida ku dhaqan oo idilna ay u siman yihiin.

Laakiinse, astaamuhu intaas oo keliya kuma saabsana. Xilliga colaadda hubaysan, Laanqayrta Cas, Bisha Cas iyo Kiristaalka cas waxaa, caalami ahaan, wadajirkooda loo aqoonsan yahay inay yihiin calaamado ilaaliya shaqaalaha caafimaadka ee ciidammada qalabka sida, alaabta iyo rugaha caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka ee rayadka, fasaxana haysta. Kuwaanna waxaa ka mid ah adeegyada caafimaadka ee Ururrada Qarameed ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas (Ururrada Qarameed) marka ay garab siinayaan adeegyada caafimaadka ee ciidammada qalabka sida ama markay si rasmi ah fasax uga haystaan madaxda, taas oo mar walba Axdiyadii Jineefa la waafajinaayo.


Astaamuhu waa ka madax bannaan yihiin diin kasta, xiriir gaar ahna lama laha siyaasad iyo dhaqan kasta. Laba siyood ayaa suuraggal ah in loo adeegsado:

- Calaamad ilaalineed, taas oo dhinacyada colaaddu ka dhexayso u sheegaysa dadka, baabuurta ama qalabka ay astaamahaasi ka muuqdaan inay waajib tahay in goor kastaba la ilaaliyo oo weligood aan la bar-tilmaameedsan ama la weerarin. Taasna waxaa loo yaqaan *adeegsiga ilaalineed* ee astaamaha, iyo

- In lagu tilmaamo qof, baabuur ama dhismeyaasha midkood inuu qayb ka yahay ururrada ay ka kooban yihiin Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Tanna waxaa loo yaqaan *adeegsiga tilmaameed* ee astaamaha.

**Astaamaha:**


Waxaa maanta jira saddex astaamood oo la adeegsado:



Laanqayrta Cas



Bisha Cas



Kiristaalka Cas

# SIDEE BAA ASTAAMAHA LOO ADEEGSAN KARAA?

Si adag ayaa adeegsiga astaamaha loogu habeeyey Heshiisyadii Jineefa ee 1949kii iyo Baratakoolladooda Dheeraadka ahaa ee soo baxay 1977kii iyo 2005tii. Laba siyood ayaa loo adeegsan karaa:

## Ujeeddooyin ilaalineed dartood

Xilliga colaadda hubaysan lagu jiro, waxaa astaamaha loo adeegsan karaa ujeeddooyin ilaalineed si loo hubiyo amniga iyo habsami-u-socodka dadka iyo waxyaabaha hoos ku taxan:

> Adeegyada caafimaadka iyo wadaaddada diimaha ee ciidamnmada qalabka sida la jira;

> Shaqaalaha caafimaadka, qalabka iyo meelaha ay ka shaqeeyaan, baabuurta Ururrada Qarameedka ah marka ay qabanayaan hawlaha adeegyada caafimaadka ee ciidammada qalabka sida, iyaga oo hoos-imaanaya xeerarka iyo xeer-hoosaadyada milatariga;

> Iyaga oo fasax cad xukuumadda ka haysta, isla markaasna iyada ka amar-qaadanaaya, waxaa kaloo astaamaha adeegsan kara isbitaallada rayadka ah, dhammaan kooxaha caafimaadka, jamciyadaha kaalmada ee mutadawiciinta ah, qalabka iyo dhismeyaasha caafimaadka, shaqaalahooda, shaqaalaha caafimaadka ee rayadka ah iyo, sidoo kale, baabuurta loo qoondeeyey daaweynta iyo qaadista dhaawaca, bukaanka iyo kuwa ay maraakiibtu badda kula jabto.

Saddexda astaamoodba meekhaan siman ayay leeyihiin, sidii qalab-ilaalineed ayaana midmid loo adeegsan karaa. Waa in ay ka muuqdaan goob cad iyaga oo aan la raacin hadal, sawirro dheeraad ah, naqshado ama faro inay raagaan loogu talo-galay.

Xilliga nabadda, astaamaha si mid mid oo qaabkooda saafi ah waxaa si calaamad ilaalineed u adeegsan karaan:

> Adeegyada caafimaadka iyo wadaaddada diimaha ee ciidammada qalabka sida la jira;

> Shaqaalaha Ururrada Maxalliga ah, goobaha caafimaadka iyo, xilliga colaadda hubaysan, gaadiidka la hawlgalin karo iyadoo oggolaansho dawladda laga haayo.

**Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) iyo Xiriirka Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas (Xiriirka Caalamiga ah), labadaasi iyagu goor walba way adeegsan karaan astaamaha (xilli nabadeed iyo mid colaadeedba).**


B. Heger/ICRC

## Ujeeddooyin tilmaameed dartood

Xilliga nabadda, astaamaha waxaa loo adeegsan karaa ujeeddooyin tilmaameed dartood, sidaasna waxaa u adeegsan kara:

- mutadawiciinta, shaqaalaha ama hantida sida dhow Dhaqdhqaaqa xiriirka ula leh (oo loola jeedo Ururrada Qaraameedka ah, ICRCda ama Xiriirka Caalamiga ah);

- waxaa iyaguna, si aan joogto ahayn, u adeegsan karaan aanbalaasyada iyo rugaha gargaarka degdegga ah ee loogu talagalay bixinta caawimaad bilaash ah ee dhaawaca iyo bukaanka, sida waafaqsan shuruucda maxalliga ah iyo oggolaansho rasmi ah oo ay ka haystaan Ururka Qarameed;

Ururrada Dhaqdhaqaaqu marka, iyada oo qayb ka ah calaamadaha lagu garto, ay astaanta ujeeddo tilmaameed u adeegsanayaan, waa in mar walba ay ku daraan magacooda ama la soo gaabiyey, sidaas awgeed uma fasaxna in "Laanqayrta Cas" ama "Bisha Cas" oo keliya ay adeegsadaan. Waxaa kaloo qasab ah in astaanta lagu muujiyo xaddi aan weyneyn, lamana oggola in lagu xirto cududda ama in laga soo laalaadiyo saanqaafka guryaha, ujeeddaduna waxay tahay in aan la isku qaldin iyaga iyo astaamaha kale ee loo isticmaalo ujeeddooyinka ilaalineed dartood.



Getty Images/ICRC

# SI-XUN-U-ADEEGSIGA ASTAAMAHA

Astaamaha oo si xun loo isticmaalo waxay yaraynaysaa qiimahooda ilaalineed, waxayna meesha ka saaraysaa ixtiraamkii xilliga colaadda loo hayn jirey. Dabadeedna waxay halis gelineysaa kooxaha xaq u leh inay isku ilaaliyaan markay daryeel caafimaad bixinayaan. Waxay wiiqaysaa helitaanka ammaan leh ee shaqaalaha Dhaqdhaqaaqa ee hawlaha aadminnimada iyo gargaarka. Waxaa, haddaba, hoos ku taxan siyaalaha aan astaamaha loo adeegsan karin:

## Ku Dayasho

Waxaa reebban in la isticmaalo calaamad, qaabka iyo midabka ay leedahay dartood, astaamaha middood lagu qaldi karo.




## Adeegsi aan hagaagsaneyn

Waxaa reebban si kasta oo xeerka caalamiga ah ee aadminnimo aan waafaqsanayn in astaantana loo adeegsado. Sidoo kale, waxaa mamnuuc ah in astaanta ay adeegsadaan dad ama hey'ado aan fasax u haysan sida shirkadaha ganacsiga, kuwa daawada farsameeya, takhaatiirta iskood u shaqaysta, ururrada aan Dawliga ahayn, shakhsiyaadka, iwm. Waxaa kaloo reebban in astaanta loo adeegsado ujeeddooyin ay suuraggal tahay inay daciifiyaan sharaftooda ama ixtiraamka ay xaqa u leeyihiin.




## Dhagar

Waxaa reebban xilliga colaadda in astaanta loo adeegsado in lagu ilaaliyo dagaallameyaasha iyo qalabka milatariga, iyada oo ujeeddaduna tahay in cadowga lagu marin-habaabiyo. Khiyaamaynta waxaa loo aqoonsan yahay dembi-dagaal marka ay sabab u noqoto geeri ama waxyeello culus oo shakhsiyeed.




Si, haddaba, loo hubiyo in astaamaha dunida oo idil laga ixtiraamo, lana wada ilaaliyo, Dawlad kasta oo wax ka saxiixday Heshiisyada Jineefa ee 1949kii waxaa xil ka saaran yahay in ay meel-mariso shuruuc maxalli ah oo looga jeedo habaynta adeegsiga astaamaha; waa shuruuc, waqti nabadeed iyo waqti dagaalba, lagu hor-joogsanaayo in si xun loo adeegsado, isla markaasna ciddii ku xadgudubta lagu ciqaabi karo.

Waxaa kaloo madaxda maxalliga ah uu xil ka saaran yahay inay qaadaan tallaabooyin dadweynaha, ganacsatada iyo bulshada caafimaadka ay ku ogeysiinayaan sida hagaagsan ee astaamaha loo adeegsado.

Sidoo kale, Ururrada Qarameedka ahi waxay madaxda iskaashi kala yeelanayaan sidii loo hubin lahaa in si hagaagsan astaamahan loo adeegsado.

Sawirrada: E. Boero

# CALAAMADAHA HAWL-QABADKA AADMINNIMO EE LAGU YAQAAN DHAQDHAQAAQA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS IYO BISHA CAS

Shaqaalaha iyo mutadawiciinta Ururka Qarameed farriin muhiim ayay dirayaan marka xilliga coladaha, masiibooyinka dabiiciga ah ama xaaladaha degdegga ah lagu jiro ay muujinayaan astaamaha Laanqayrta Casa ma Bisha Cas. Waa farriin xanbaarsan hawsha ay ku jiraani inay tahay mid aadminnimo oo barax la', sidaas darteedna ay waajib tahay goor walba in la ixtiraamo, iyaga oo nabad qaba, siday ku gaari lahaayeen dadka iyo bulshooyinka ay rabshadaha sida xun u saameeyeen.

Kuwa Dhaqdhaqaaqa ka tirsan ee iyagana ay calaamaduhu ka muuqdaan waxaa waajib ku ah in xilkooda aadminnimo ay ku fuliyaan si waafaqsan Toddobada Mabda'ee Asaasiga ah, Dhaqdhaqaaqana u degsan; kuwaas oo kala ah: aadminnimo, eex la'aan, dhexdhexaadnimo, madaxbannaani, adeeg mutadawacnimo, midnimo iyo caalaminnimo. Markaas bay dadku garanayaan in hawshoodu aysan ku xirnayn ajendo siyaasadeed, mid diineed, mid ciidan amase mid dhaqaale, sidaas darteedna loo baahan yahay in loo soo joogsado, lagu kalsoonaado, cid walibana ay ixtiraamto.

Arrimahaas in la fahmaa waa lamahuraan, maxaa yeelay macnaheedu wuxuu yahay, dhinacyada colaadda mid kastaba ha ka soo jeedeene, in dadku niyadda shaqaalahaas uu kalsooni u hayo. Tanina shaqaalaha Laanqayrta Cas, Bisha Cas iyo mutadawiciintaba waxay ka kaalmaynaysaa in si nabad ah ay ku gaaraan dhammaan dadka iyo bulshooyinka baahida u qaba, xataa waqtiga colaadda iyo dhibaatooyinka kale ee aadminnimo mararka ay jiraan.




B. Mayer/ICRC

# ASTAAMO RAAGEY

Henry Dunant oo ahaa ganacsade Iswiis ah ayaa 1859kii isaga oo sodcaal ku maraya waqooyiga Talyaaniga wuxuu indhihiisa ku soo arkay natiijooyinkii foosha xumaa ee ka dhashay goobtii dagaal ee ka dhacday gudaha iyo agagaarka magaalada Solferiino. Wuxuu aad iyo aad uga murugoodey kumanyaalkii goobtaas ku daawacmay iyo askartii dhimaneysey ee iyaga oo daryeel caafimaad aan helin la isaga dhaqaaqay, dabadeedna wuxuu qoray oo faafiyey buug uu ku magacaabay *Xusuustii Solferiino*; kaas oo uu ku soo bandhigay laba talo oo dhibbaneyaasha dagaalka lagu kaalmayn karo:

> In waqtiga nabadda, dal kasta laga abuuro jamciyado gargaar oo ka kooban mutadawiciin diyaar u ah inay daryeelaan askarta xilliga dagaalka dhaawacanta, iyo

> In dalalku ku heshiiyaan fikradda ah in la ilaaliyo dhaawaca iyo bukaanka goobta dagaalka iyo, sidoo kale, kuwa iyaga daryeelaaya.

Talada koowaadi waxay u horseedday in dal kasta oo dunida ku yaal laga dhiso Urur Qarameed ah ee Laanqayrta Casa amaba Bisha Cas.

Talada lanbaadna waxaa ka dhashay qaadashada Axdiyada Jineefa. Maanta Dawladaha oo idil ayaa aqoonsan Afarta Axdi ee Jineefa ee 1849kii, isla markaasna ku qasban in ay dhaqmaan. Waxay kaloo taladaasi u horseedday in la isla qaato calaamad calaamadaha kale oo dhan ka duwan, taas oo gacan ka geysan karta ilaalinta shaqaalaha caafimaadka milatariga, mutadawiciinta gargaarka iyo dadka dhaawacma inta xilliga colaadda lagu jiro.

Calaamaddaas - amaba astaantaas sida waayadii dambe loo bartay – waxay noqotay mid sahlan, meel fog laga aqoon karo, qof waliba uu garanaayo, mar walbana isku mid ah.

Shir diblomaasiyeed oo 1864kii nagaalada Jineefa lagu qabtay ayaa lagu oggolaaday Laanqayrta Cas ee goobta cad ku taal, iyada oo midabbaduna yihiin isla kuwa calanka Iswiiska oo meeshii gadaal ahayd la horraysiiyey. Dabadeed, 1876 ilaa 1878kii, dagaalkii Ruushanka iyo Turkigu intii uu socdey ayaa Imberaadooriyaddii Cusmaaniyiintu waxay ku dhawaaqday in Laanqayrta Cas baddalkeeda ay, maantaas ka dib, Bisha Cas adeegsan doonto; taas oo noqotay calaamad si rasmi ah loo aqoonsaday sannadkii 1929kii, markaas oo isbaddel lagu sameeyey Axdiyadii Jineefa ee Koowaad.

Sannadkii 2005tii ayaa, haddana, Dawladihii Heshiisyada Jineefa qaybta ka ahaa waxay oggolaadeen astaan kale oo ah midda kiristaalka cas. Kiristaalka casi waxay leedahay meekhaan sharciyeed oo la mid ah midka ay leeyihiin Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, waxaana loo isticmaali karaa isla sida labadaas loo isticmaalo iyo isla shuruurada u dhigan. Waxaa adeegsan kara Dawladaha iyo Ururrada Qarameedka ee aan jeclayn Laanqayrta Cas amaba Bisha Cas inay adeegsadaan.

Si aad u hesho warar dheeraad ah oo arrintaan ku saabsan booqo: www.icrc.org/eng/war-and-law/emblem/overview-emblem.htm

## BAYAANADA ERGADA

**Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC)** waa urur aan eex lahayn, dhexdhexaad ah, isla markaasna madax bannaan. Xilka qura ee uu leeyahay waa in xilliga colaadda iyo xaaladaha kale ee gacan-ka-hadalka uu ilaaliyo nolosha iyo sharafta dhibbaneyaasha, isla markaasna uu u gargaaro. Waxay kaloo ICRCdu ku dedaashaa inay silica dadka iska hor-taagto, iyada oo taasna u maraysa baahinta iyo xoojinta xeerka aadminnimada iyo mabaadi'da caalamiga ah ee aadminnimada. ICRCda oo la asaasay 1863kii ayaa ka dambaysey Heshiisyada Jineefa iyo Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Iyada ayaa jahaysa, iskuna dubbe-ridda hawlaha caalamiga ah ee xilliga colaadda iyo xaaladaha kale ee gacan-ka-hadalka uu Dhaqdhaqaaqu qabto.

**Xiriirka Caalamiga ah ee Ururrada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas** waa midka ugu ballaaran shabakadaha aadminnimo ee wax-qabadkoodu uu mutadawacnimada ku dhisan yahay. Annaga oo ah 190 xubnood oo ka kooban Ururrada Qarameed ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, dunida oo idilna ka kala socda, waxaan ku dhexjirnaa bulsho kasta, annaga oo sannad walba gaarna dad dhan 160.6 malyan, isla markaasna u fulinna barnaamijyo ku saabsan adeegyada waqtiga fog. Sidoo kale, waxaan gaarna dad dhan 110 malyan oo aan u fidinna ficil celin degdeg ah markii masiibooyin ay dhacaan iyo barnaamijyo degdeg ee masiibooyinkaas ka kabasho. Waxaan hawl-galnaa masiibooyinka iyo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadku inta aanay dhicin, goorta ay dhacaan iyo ka dib markay dhacaan, si aan baahida u daboolno, una wanaajinno nolosha dadka jilicsan. Taasna waxaan ku fulinnaa annaga oo aan cidnaba ugu eexaneyn dalka ay ka soo jeedaan, isirkooda, jinsigooda, caqiidadooda diineed, kala sarreyntooda iyo fikradooda siyaasadeed.

facebook.com/icrc
twitter.com/icrc_Africa
instagram.com/icrc_somalia

Ergada ICRC Soomaaliya
Wadada Denis Prit
S.B. 73226-00200
T:+254 202719 301
Nayroobi, Kenya
© ICRC, Oktoobar 2017

ICRC

0876/0402 12.2017 1000

Garbedka hore: D. Aloisi/ICRC, M. al-Khuzai/IFRC